



Fahamka Habka Adeegga Hor u billaabidda Dhexdhexaadinta ee Minnesota

(Understanding the Early Intervention System in Minnesota (Condensed version) —Somali version)

Waa maxay Adeegga Hor u billaabidda Dhexdhexaadinta?

Adeegga Hor u billaabidda Dhexdhexaadinta waa qorsho howleed oo wada xiriira ee loo adeegsado koritaanka iyo horumarka ilmaha iyo in lagu caawiyo reerka sanadaha ugu horeeya ilmaha dhalasho ee qatarta ah. Waxey reerka u qalmi karaan howlahaa adeegga hor u billaabidda dhexdhexaadinta ah, marka ay ilmahu dhashaan ilaa sadex jir. Howlahaa waa kuwo la fuliya iyadoo la xugsanayo sharciga federaaliga ee adeegga waxbarashada dadka naafada ah. Mowqifka laga leeyahay adeegga hor u billaabidda dhexdhexaadinta, waa in lagu caawiyo reerka si ay u helaan waxyaabaha uu ilmahooda dib u dhaca leh ama naafada ah u baahan yahay.

Maxaa ka mid ah Hor u billaabidda Dhexdhexaadinta?

Adeegga hor u billaabidda dhexdhexaadinta waxaa lagu helaa, in loo sameeyo reerka iyo ilmaha qorsho daryeel goyska ah ee iyaga u gaar ah. Dadka xirfadda u leh hor u billaabidda dhexdhexaadinta iyagoo si xiriiran ula shaqeeynaya reerka, ayey isu keenaan howlaha iyo cidda ka caawisa reerka si loo fuliyo baahida qaaska ah ee ilmaha ama reerka leeyahay. Dhexdhexaadinta waa iney ahaataa howl loogu tala galay iney xoojisaa horumarka ilmaha iyadoo la qadarinayo jadwalkaaga maalmood. Ka qeyb qaadashada adeegga hor u billaabidda dhexdhexaadinta waa mid aan qasab kugu aheyn oo waxaad dooran kartaa howsha ku haboon ilmahaaga iyo reerkaagaba.

Reerka lacag kama bixiyo adeegga hor u billaabidda dhexdhexaadinta. Adeegga waxaa kaloo ka mid noqon kara:

- Hab bixin u gaar ah ilmaha marka ey dhalaanka yihiin iyo howlaha la xiriira sida hadalka, xirfadda iyo daweynta jirka (physical therapy).
- Wargelinno ah sida loo caawiyo ilmaha si uu xirfad u yeesho inta uu guriga joogo.
- Xiriirin ah meelaha aad ka heli karto caawinaadda degmada.

Sidee buu reerka uga qeeb qaadan karaa hor u billaabidda dhexdhexaadinta?

- Waa in reerku bixiyaa ogolaasho qoraal ah inta aan la bilabin qimeeynta ilmaha iyo inta aan howshu bilaaban.
- Waxaad la imaan kartaa qof reerka ka mid ah, saaxiib ah ama jaaliyadda ka socda si uu kaala qeyb khaato shirarka.
- Cod baad ku leedahay go'aannada laga gaarayo qorshaha ilmahaaga.
- Waxaad ogolaan kartaa ama diidi kartaa gebigood howlaha lagugu deeqay, ama qaar ka mid ah.

Xaggee lagu bixiyaa adeegga hor u billaabidda dhexdhexaadinta?

Adeegga hor u billaabidda dhexdhexaadinta waxaa inta badan lagu bixiyaa guriga, xannaannada ilmaha, ama halka ilmaha horey loogu tarbiyeeyo (early head start program). Dad ka mid ah kooxda ayaa la shaqeeynaya ilmaha, oo adiga ama ciddii kale ee daryeeleysa ilmaha tusaya sida ugu haboon ee loo caawiyo.

Talaabooyinka la qaado xagga Adeegga Hor u billaabidda Dhexdhexaadinta

Tani waa aragti guud oo ah talaabooyinka reerkaadu u baahanyahay in uu qaato xagga qorsheynta hor u billaabidda dhexdhexaadinta.

Waxaa jira waqtiyo go’an oo in aad aqoonsanaato loo bahan yahay marka talaabooyinkan la qaadano.

Tixraacid

Waa in ilmaha loo xixgeliyaa Adeegga Hor u billaabidda Dhexdhexaadinta marka ugu horeysa ee lagu tuhmo in ey leeyihiin wax dib u dhac ah xagga koritaanka ama caafimaad darro lagu sheego. Waalidka, dad reerka ka mid ah, dhaqaatiirta, cusbitaalka, kaaliyaha caafimaadka bulshada, itaaba waa u texgelin karaan ilmaha in loo helo qorsho ah adeegga hor u billaabidda dhexdhexaadinta.



Ogolaansho/baaris

Qof ayaa kula soo xiriiraya si aad uga wada hadashaan waxyaabaha aad walwal ka qabto.



**Howl fududeeye ayaa loo xil saarayaa
Qiimeeyn lagu ogaanayo in uu u qalmo**

Tani waa in ay dhacdaa 45 casho tixraacidda gudaheeda. Koox taqasus ah ayaa kula kulmaya adiga iyo ilmahaba si loo qiimeeyo in ilmahu u qalmo howsha.



Qorshaha Daryeelka qoyska u gaar ah

Koox taqasus ah ayaa kula kulmaya si aad uga wada hadashaan natiijyadii ka soo baxay qiimeeynta iyo si loo qoro qorsho u gaar ah baahida qoyskaagu leeyahay looguna daryeelo. Haduu ilmaha u qalmi waayo, waxaa lagu siinayaa warbixinno ah halka degmada aad ka heli karto waxaad isku deebirto.



Howsha waa bilaabanaysaa

Marka qorsheynta qorshaha daryeelka qoyska dhamaado, waalidku waa in sida ugu dhaqsida badan u saxiixaa qorshaha inteysan howshu bilaaban.



Dib ugu noqosho qorshaha daryeelka qoyska 6 bilood mar ah

Howl bedelid ama qiimeeyn siyaado ah lagu daro

Dib ugu noqosho qorshaha daryeelka qoyska sanadkiiba mar ah



Howl bixin joogto



Marxalad kala guurka 3 jir

Ilmahu markuu gaaro 3 jir, marxaladiisu waxey isu bedeleysaa qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed ee dugsiga xannaanada. Taasi waa haduu u qalmo waxyaabaha la iska doonayo. Haduu u qalmi waayo, waxaa lagula xiriirinayaa howlaha kale ee degmada kugu deeqi karta adiga iyo ilmahaba.